# TIJAABADA QIIMEYNTA FLEX EE MINNESOTA



## SU'AALAHA BADANAA LA ISWEYDIIYO

Barnaamijka Tijaabada ee Qiimeynta Flex wuxuu siiyaa ka qaybqaatayaasha hab cusub oo ay lacag uga keydistaan biilkooda tamarta. Marka la isticmaalayo Qiimeynta Flex, qiimooyinka korontada ayaa isbbedela iyadoo ku xiran waqtiga maalinta. Taas macnaheedu waa biilkaagu wuxuu ku xiran yahay inta ay tahay qiyaasta korantada aad isticmaasho iyo sidoo kale wakhtiga aad isticmaasho. Xcel Energy waxay ku tijaabinaysaa Qiimeynta Flex 10,000 macaamiil oo jooga Minnesota. Sii akhri si aad u hesho jawaabaha su'aalaha badanaa jiro.

### Waa maxay qiimeynta Flex?

Marka la isticmaalayo Qiimeynta Flex, qiimeynta korontada ayaa ku xiran waqtiga maalinta ee korontada la isticmaalo.

Kharashka korontada wuu sareeyaa si loo soo saaro marka baahidu sarreyso. Inta lagu jiro waqtiyadan marka macaamiisha ay isticmaalayaan tamarta ugu badan, waxaan inta badan u baahanahay inaan ka helno tamar ilaha kharash badan waxaana si badan ugu tiirsanaanaa shidaalka, kuwaasoo si aad ah aan ugu fiicneyn bay'adda.

Taasi waa sababta ay macaamiisha ku jira barnaamijka tijaabada uga bixiyaan lacag yar tamarta ay isticmaalaan habeenkii, marka ay soo-saarista korontada jaban tahay. Qiimooyinka tamarta ayaa sareeya saacadaha fiidka—si fiican si looga tarjumo qiimooyinka dhabta ah ee soo saarista tamarta.




Qiimaha korantada xilliga qaboobaha ayaa dhaqan galayo laga bilaabo Oktoobar ilaa Maayo.
Qiimaha korantada xilliga xagaaga ayaa dhaqan galayo laga bilaabo Juun ilaa Sebtembar.

### Maxay tahay Sababta Xcel Energy ay u Sameynayso Tijaabada Qiimaha Flex?

Tijaabada ayay ujeedadeedu tahay inay ka faa'iideystaan dhammaan macaamiisha, waxayna caawin doontaa qiimeynta korontada mustaqbalka ee gudaha Minnesota. U wareejinta isticmaalka tamarta saacadaha saxmaddu hooseyso waxay naga caawinaysaa inaad si wanaagsan u maareyno fiilooyinka tamarta, yareynta isticmaalka shidaalka, iyo isticmaalka tamar badan oo la cusbooneysiin karo. Haddii aan ka fogaano kicida sicirka dalabka, waxaan ka fogaan karnaa dhisida warshado cusub oo koronto mustaqbalka, iyadoo yareynaysa kharashka ka baxa qof kasta.

## Yaa ku jira barnaamijka tijaabada ah?

Waxaad ka dooranaa 17,500 ka qeybgaleyaasha tijaabada oo ka yimid Koonfurta Minneapolis iyo goobaha Eden Prairie. Waxaan dooran kaqaybgalayaasha tijaabada iyadoo lagu salaynayo dhowr arrimood, oo ay ku jiraan isticmaalka tamarta iyo nooca guriga. Waxaan dooranay goobaha tijaabada innagoo tallo ka helayna hoggaamiyeyaasha maxalliga ah, bulshooyinka iyo Guddiga Korontada ee Dawladda. Waxaan dooneynaa inaan hubinno in kaqaybgalayaasha tijaabada ay u matalaan dhammaan macaamiishayada si siman, sidaa darteed waxaan hubin karnaa in casharrada aan ka barano tijaabadda lagu dabaqi karo qof kasta.

Iyada oo qayb ka ah daraasadda tijaabada ah, koox ah 7,500 oo macaamiil oo aan la kala soocin ayaa helay miitaro casri ah, balse waxay ku sii jiri doonaan qiimeynta hadda jirta inta lagu jiro tijaabada. Kooxdan waxay naga caawisaa qiyaasida sida wax ku oolka ah qiimaha cusub yahay galinada lagu dhiirado isticmaalka tamarta.

Haddii aad ka mid tahay 10,000 ee macaamiill ee ku jira Qiimeynta Flex, waxaan markii hore boosta kuu soo dirnay baqshad soodhawayn Maarso 2020. Taariikhda tijaabada waa la baajiyey, markaas kaqaybgalayaasha ayaa helay baqshad soodhawayn oo kale Oktoober 2020.

## Miyay Qiimeynta Flex kordhin doontaa biilkayga tamarta?

Celcelis ahaan, biilasha ka-qaybqaatayaasha tijaabada waxay qiyaastii ahaan doonaan sida ay maanta yihiin. Shakhsi ahaan, biilkaagu wuxuu ku xirnaan doonaa goorta aad isticmaasho iyo inta ay dhan tahay korantada aad isticmaasho, waxaadna fursad u heli doontaa inaad lacag dhigaashato haddii aad isticmaasho tamar yar saacadaha saxmaddu jirto (3-da galabnimo ilaa 8-da galabnimo maalmaha shaqada).

Laakiin hadaadan dhigaalin, waxaan ku siin doonaa caymis sannadka ugu horreeya ee barnaamijka. Dhammaadka sannadka ugu horeeya, haddii biilashaada ay ka badan yihiin 10% in ka sarreeya waxa ay noqon lahaayeen marka loo eego qiimaha caadiga ah, waxaad heli doontaa deyn biileed u dhigma qaddar ka sarreysa 10% kaas.

Haddii aad ka diiwaangashan tahay Barnaamijka Caawinta Tamarta, waxaad haysataa fursad dhigaalin oo la mid ah, waxaana sidoo kale xaqiijin doonnaa in biilkaaga billaha ah uusan kordhin sanadka koowaad ee tijaabada. Haddii aadan dhigaalsan inta lagu gudajiro sanadka ugu horeeya, waxaad heli doontaa deyn biileed bil kasta oo aadan dhigaalsan, si biilkaaga looga dhigo intuu ahaan lahaa haddii la raaco qiimaha caadiga ah. Dhammaadka sannadka labaad, haddii biilashaada ay ka badan yihiin 10% in ka sarreeysa waxa ay noqon lahaayeen marka loo eego qiimeynta caadiga ah, waxaad heli doontaa deyn hal mar ah oo u dhigmata qadarka ka sarreeya 10% kaas.

Haddii aad ka guurto aagga tijaabada ama aad ka baxdo Qiimeynta Flex, xaq uma yeelan doontid deymaha ilaalinta biilka ee mustaqbalka.

## Sidee ayaan lacag uga kaydisan karaa Qiimeynta Flex?

Lacag kaydsashadu way fududdahay oo waxay la mid tahay si adigoo isbeddelo yar ku sameynayo jadwalkaaga. Halkan waxaa ah dhowr waxyaabood oo yaryar oo lacag kuu kaydin kara:

- Dharka dhaqo Sabtida iyo Axada beddelkii habeenimada maalmaha shaqada.
- Daar hawo qaboojiyahaaga waxoogaa sare ah habeenkii si aad u qaboojiso gurigaaga una isticmaasho maalinta xigta. Xaqiiji inaad dib u daarto qalabka maareynta hawada (thermostat)  subaxdii.
- Ku dhaq weelasha oo dhan mashiinka weelal dhaqa ka hor intaadan seexan beddelkii aad dhaqi lahayd cashada ka dib. Makiinkaaga weelal dhaqa ayaa lahaan kara badhanka “dib u dhigida (delay)”, taasoo ka dhigaysa mid aad u fudud.

Booqo **xcelenergy.com/FlexPricing** si aad u heshid talooyin dheeri ah oo lacag lagu kaydisto. Xaqiiji inaad eegto aaladaha iyo tallooyinka gaarka ah ee laga heli karo khadka iyadoo loo marayo My Account. Booqo **xcelenergy.com/MyAccount** si aad u gasho ama isku diiwaangeliso.

## Miyay Qiimeynta Flex caawisaa bay'ada?

Qiimeynta Flex waa hal dariiq oo aan uga wada shaqeyn karno yareynta baahida korontada xiliga ay saxmaddu jirto. Baahidu waa qadarka korantada ee loo baahan yahay si dhammaan macaamiishayaga loo siiyo dhammaan korantada ay u baahan yihiin waqti kasta maalintii. Markii baahidu ay kor u kacdo, waxaan had iyo jeer u baahanaa inaan tamar ka helno ilo qaal ah oo ku tiirsan shidaalka dabiiciga ah, kuwaa oo aan u wanaagsanayn bay'ada.

Haddii aan yareyn karno kor u kaca baahiyada korantada, waxaan xitaa hadda si weyn u isticmaali karnaa tamar badan oo dib loo soo cusbooneysiin karo waxaana ka fogaan karnaa dhisidda warshado tamar oo cusub mustaqbalka.

## Ilaa intee ayuu socon doonaa barnaamijka tijaabada ah?

Waa la baajiyey taariikhda tijaabada guga 2020, laakiin Qiimeynta Tijaabada ah ee Flex waxay socon doontaa labo sano, laga bilaabo 1-da Noofember illaa iyo Oktoober 31 2022.

## Waa maxay miitir casri ah?

Miitirka casriga ah wuxuu cabiraa isticmaalka korantada wuxuuna macluumaadkaas la wadaagaa Xcel Energy fiilo la'aan. Miitarada casriga ah waxay ku siinayaan faa'idooyin badan, oo ay ka mid yihiin oggaanshaha koronto la'aanta ee iyo jawaab-celinta oo la wanaajiyay, aalado bogeed ee mustaqbalka oo kaa caawin kara inaad gaarto go'aamo waxgal ah oo dheeraad ah oo ku saabsan isticmaalkaaga tamarta, iyo barnaamijyo iyo adeegyo mustaqbalka ah oo kaa caawin kara inaad tashiilato tamarta iyo lacagta.
Miitirada casriga ah waxay cabiraan isticmaalkaaga tamartaada shantii daqiiqaba mar. Sidan ayaad ku ogaan kartaa inta ay le'eg tahay tamarta aad isticmaashid iyo wakhtiga aad isticmaashid.

## Ka waran haddii aan rabin inaan ka qaybqaato?

Waad ka bixi kartaa wakhti kasta inta lagu guda jiro tijaabada labada sano ah. Kaliya u dir iimayl **inquire@xcelenergy.com** ama wac **800.895.4999**. Haddii aad ka baxdo, uma qalmi doontid deymaha ilaalinta biilka korontada ee mustaqbalka.

## Ka waran haddii aan qabo su'aalo dheeraad ah?

Booqo **xcelenergy.com/FlexPricing**, imayl u dir **inquire@xcelenergy.com** ama wac **800.895.4999**.

xcelenergy.com | © 2020 Xcel Energy Inc. | Xcel Energy is a registered trademark of Xcel Energy Inc. | 20-09-621